



Victim First

Leicester, Leicestershire & Rutland



Victim First waa adeeg bilaash ah, madax bannaan oo sir ah oo loogu talagalay dhibbanyaasha iyo markhaatida dembiga ee Leicester, Leicestershire iyo Rutland. Waxaa noogu muhiimsan in aan hubinno in adiga lagu siiyo taageerada dadka oo dhan (da' walba) ay u baahan yihiin si looga caawiyo in ay wax u adkaystaan oo ay wax ka bogsadaan. Waxa aan garanaynaa in ay kaladuwan yihiin baahiyaha dadka oo dhan taas awgeed ayaana adeeggayaga loogu habeeyey si baahiyahaaga loogu toosiyo. Haddii dembiga laga warbixiyey iyo haddii kale, iyo goor kaste oo uu dhacay, diyaar ayaan adiga kuu nahay.

0800 953 95 95

www.victimfirst.org | support@victimfirst.pnn.gov.uk


Waxa aan haysannaa koox ka kooban hawladeenno kiis oo khibrad leh oo xirfadleyaal ah, oo ay taageeraan koox ka kooban mutaddawiciin huran oo tababbar badan qaatay si dhibbaneyaasha looga caawiyo socdaalka ay u galaan bogsashada.

Taageerada waxaa ka mid noqon karta:

Taageero Shucuureed; hawladeennada kiiska ayaa loo tababaray in ay dadka dhegeystaan, beerjileec u muujiyaan ayna gartaan saamaynta shucuureed ee dembigu u keeni karo dhibbanaha. Qof aad kula hadasho fool ka fool (booqashooyinka guriga ama booqashooyinka bulshada dhexdeeda), dhanka telefoonka ama sheekaysiga internetka. Waxa aan macluumaad iyo talo kaa siin doonnaa duruufkaada gaarka ah.

Tallaabooyinka Ka hortagga Dembiga; waxaa si toos ah noogu diyaar ah adeeg lagu adkeeyo abbaarta (target hardening service) oo ku deeqa qiimaynta iyo tallaabooyinka ka hortagga dembiga 48ka saacadood ee ka dambeeya gudbinta. Waxa aan weliba bixinnaa talo intaas ka ballaaran oo lagaga hortago dembiga.

Taageerada Caafimaadka Maskaxda; waxa noo diyaar ah kalkaalayyaal caafimaad maskax si loo hubiyo in taageero takhasus leh lagaa siiyo wanaagqabka maskaxdaada.



Qareenimo; magacaaga ayaan ku hadli karnaa si aan kaaga caawinno in aad hesho adeegyada aad xaq u leedahay matalan taageero aad u doonato masuuliyiinta guraynta ee xaafadda.

Macluumaad iyo Talo; waxa aan macluumaad iyo talo kaa siin karnaa dhacdada ama ururrada kale ee ku caawin kara.

Helitaanka Taageero Takhasus leh; waxa aan kuu tilmaami karnaa urur habboon ama toos ayaan kuu gudbin karnaa marka aad oggolaato. Waxa aan marwalba kuugu deeqi doonnaa taageero dambe si aan u hubinno in aadan dareemin in dadku iskaa dhaafinayaan. Waxa aan weliba haysannaa Hawlwadeen kiis takhasus u leh carruurta iyo dhallinyarada oo qayb ka ah kooxdayada.



Caddaaladda Wax lagu saxo; tani waa marka aad la kulmi karto ama toos ula xiriiri karto dembiilaha. Waxa uu qofkaasi iska xil saari doonnaa habdhaqankiisa waxa aanad u sharxi kartaa saamaynta kaas adiga kaaga yimid su'aalo ayaanad weydiin kartaa. Waxa aan haysannaa Hawlwadeen kiis Caddaaladda Wax lagu saxo (Restorative Justice Caseworker) u huran oo qayb ka ah kooxdayada, qofkaas oo adiga kaala hadli kara caddaaladda wax lagu saxo waxa uuna baari karaa haddii aad rabto in aad fursad u hesho in aad la xiriirto qofka waxyeello kuu geystey.